https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt.html
Su'aalaha Markasta La Isweydiiyo

Su'aalaha Markasta La Isweydiiyo

1. Yaa go'aaminaya haddii cunug/arday uu u qalmo barnaamijka P-EBT?
Dugsi kasta/degmo dugsiyeed kasta waxay TDHS siisaa macluumaad ku saabsan ardayda u-qalma inay helaan P-EBT ga. Haddii adigu aadan hubin haddii ilmahaagu uu helayay cunnooyin bilaash ah ama qiimo jaban iskuulka laga siinayay, ama haddii ilmahaagu dhigto iskuulka Bixinta U-Qalmitaanka Bulshada, Bixinta 2 ama 3, kala xiriir dugsigaaga wixii faahfaahin ahba.

2. Goorma ayaan helayaa manfacyadayda barnaamijka P-EBT?
Wareeg kasta oo P-EBT ga ah wakhti ayaa loo qabtay oo waxay ku xiran tahay oggolaanshaha federaalka iyo iskaashiga ka dhexeeya Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee iyo Waxbarashada ee Tennessee. Si loo hubiyo heerka iyo taariikhda qaybinta mangacyada P-EBT ga, waalidiintu waxay isticmaali karaan Barta Waalidka ee P-EBT ga iyaga oo booqanaya **https://tdhs.service-now.com/relief** ama wac khadka taleefoonka ee P-EBT ga **1-833-496-0661.** Taariikhaha qaybinta sidoo kale waxaa lagu wadaagaa **Barta internetka TDHS,** iyo TDHS **Facebook-ga** iyo **Twitter** koontada.

3. Meeqaa ayaan helayaa?
Qaddarka lagu soo shubayo P-EBT ga waxaa sal loogu dhigayaa arday walba xaaladdiisa waxbarasho ee iskuulkiisa taasoo ay xaqiijisay iskuulkooda waxayna ku kala duwanaan kartaa arday ilaa arday, xitaa qoys ahaan. Si aad u aragto qaddarka lacag ee ilmahaagu uu heli karo, booqo P-EBT ga ee Barta Waalidka (Parent Portal) oo ah **https://tdhs.service-now.com/relief.**

Waxaad ka hubin kartaa kaarkaaga P-EBT ga inta ku jirta www.connectebt.com ama adiga oo waca lambarka ku qoran qaybta dambe ee kaarkaaga P-EBT ga.

4.Sidee ayaan ku helayaa manfacyadayda barnaamijka P-EBT?
Waxaad heli doontaa kaar P-EBT ga oo loogu talagalay ilmo kasta oo xaqa u leh oo qoyskaaga ka tirsan oo waxaa loogu soo diri doonaa boosta ee ciwaanka dugsigu kaa hayo. Si loo hubiyo inaan haysano ciwaanka saxda ah fadlan booqo **https://tdhs.service-now.com/relief** sida ugu dhakhsaha badan - gal/koonto ka samayso, dhagsii batanka Xariirka Waalidka, oo cusboonaysii ciwaankaaga haddii loo baahdo.

5. Ma sii haystaa kaarkayga P-EBT ga ka dib markaan isticmaalo lacagta?
Haa, waa inaad haysataa kaadhkaaga haddii aad u qalanto faa'iidooyinka barnaamijka P-EBT mustaqbalka. Kaarkaaga dib ayaa loogu soo shubi doonaa ilaa inta barnaamijku sii socdo oo aad u qalmayso.

6. Muxuu ardaygaygu uu u heli waayey kaarka P-EBT?
Haddii ay kula tahay in ardaygaagu u qalmo laakiin aadan helin kaar, Wac khadka caawimaadda P-EBT lambarka waa **833-496-0661.**

7. Cinwaankeyga waa qalad, ma cusbooneysiin karaa cinwaankayga?
Haa, si aad u cusbooneysiiso fadlan booqo **https://tdhs.service-now.com/relief** gal/koonto samayso, dhagsii batanka Barta Waalidka oo cusboonaysii ciwaankaaga hadba sida loogu baahdo. Sidoo kale waxaad soo wici kartaa khadka Caawinaada ee P-EBT ga adigoo soo waca lambarka **833-496-0661.**

8. Anug ku ma raacsani lacagta P-EBT ga ee ilmahaygu helay, maxaan samayn karaa?
Qoysaska raba inay rafcaan/dacwad ka qaataan waxay gali karaan Barta Internetka ee

https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt.html
Su'aalaha Markasta La Isweydiiyo

Rafcaanka/Dacwad ka qaadashada oo ah: **https://appealsonline.dhs.tn.gov/Home/Login** ama wac **(833) 496-0661**. Qoysasku waxay haystaan 10 maalmood laga bilaabo taariikhda carruurtu heleen kaararka si ay racfaan uga qaataan.

9. Waxaa la ii sheegay in ilmahaygu ayna u qalmin inuu helo ama ay hesho P-EBT ga, laakiin waxaan aaminsanahay inay u qalmaan. Maxaan sameyn karaa?
Qoysaska raba inay rafcaan/dacwad ka qaataan waxay gali karaan Barta Internetka ee Rafcaanka/Dacwad ka qaadashada oo ah: **https://appealsonline.dhs.tn.gov/Home/Login** ama wac **(833) 496-0661**. Qoysasku waxay haystaan 10 maalmood laga bilaabo taariikhda carruurtu heleen kaararka si ay racfaan uga qaataan.

10. Anigu ma rabo inaan isticmaalo lacagaha P-EBT. Maxaan sameeyaa?
Haddii aadan dareensanayn in qoyskaagu u baahan yahay manfacyada P-EBT ga, oo aad jeclaan lahayd inaad diido manfacyada, fadlan iska gooy kaarka ka dib marka aad hesho. Manfacyada P-EBT ga la ma wareejin karo. Sidoo kale waad iska diidi kartaa inaad ka qaybgasho booqasho **https://tdhs.service-now.com/relief** gal/koonto ka samayso, dhagsii batanka Xariirka Waalidka oo dooro Manfacaha Diidmada.

11. Waxaan helay kaarka P-EBT ga ee ardaygayga, sideen u furaa kaarka?
Fadlan wac **1-888-997-9444** si aad kaarta u furato. Si aad u furato kaarka, waxaad u baahan doontaa afarta (4) lambar ee ugu dambeeya kaarka P-EBT. Markii lagu weydiiyo afarta (4) lambar ee ugu dambeeya lambarka sooshiyal sekuuritiga ee ilmaha, waxaad gelisaa 0000 iyo taariikhda dhalashada ilmaha ku qoran kaarka dushiisa. Inta aad ku jiro furitaanka kaarka waxaa laguu tilmaamayaa inaad doorato afar lambar oo aqoonsi shaqsiyeed (PIN) ah oo aad ugu adeegsan doonto dukaamada oo ay la socoto kaarka si aad wax ugu soo iibsato manfacyada kaarka lagu soo shubay.

12. Ma waxaa la iiga baahan yahay inaan kaarka P-EBT ga ee ardaygayga aan u furo taariikh cayiman?
Waalidiin/qoysas kasta waxaan ku dhiiri galinaynaa inay furaan kaarka P-EBT ga ee ardayga isla marka kaarka la helo.

13. Ma waxay tahay inaan wada isticmaalo dhammaan manfacyada P-EBT ku jiro markaan helo kaarka?
Maya. Manfacyada P-EBT lagu soo shubo oo aadan isticmaalin lacagtaas waxay sii socon doontaa bil ka bil oo way ku sii jiri doontaa. Lacagaha aan la isticmaalin ayaa laga saari doonaa kaarka P-EBT hal sano kadib.

14. Sideen ku hubiyaa lacagta ku jirta P-EBT?
Waxaad soo wici kartaa **1-888-997-9444** (lambarka ku qoran qaybta dambe ee kaarkaaga P-EBT ga) si aad u hubiso lacagta kaarka P-EBT ku jirta.

15. Waxaan waayey kaarkayga P-EBT ga. Ma heli karaa mid cusub?
Haa. Booqo **www.connectebt.com** si aad u codsato kaar cusub ee P-EBT ga ah ama wac **1-888-997-9444.**

16. Xageen ku isticmaali karaa manfacyadayda P-EBT ga la iigu soo shubo? Maxaan ku iibsan karaa lacagta kaarka lagu soo shubo?
Lacagta lagugu soo shubo kaarkaaga P-EBT ga waxaad wax kaga soo iibsan kartaa dukaan kasta oo aqbala SNAP, oo ay ku jiraan **ka dooro dukaammada onlaynka ah**. Dukaammada badankood waxay leeyihiin calaamado sheegaya inay aqbalaan SNAP ama EBT.

https://www.tn.gov/humanservices/p-ebt.html
Su'aalaha Markasta La Isweydiiyo

17. Ka waran haddii aanan isticmaalin dhammaan lacagaha P-EBT ga ku jirta?
Manfacyada P-EBT lagu soo shubo oo aadan isticmaalin lacagtaas waxay sii socon doontaa bil ka bil oo way ku sii jiri doontaa. Lacagaha aan la isticmaalin ayaa laga saari doonaa kaarka P-EBT hal sano kadib.

18. Maxaan ku iibsan karaa lacagta ku jirta kaarka P-EBT?

Waxaad ku soo iibsan kartaa inta badan cuntada darayga ah, qasacadaysan, barafeysan waxyaabaha ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobnayn oo kaliya:

- Qudaarta iyo miraha fareeshka ah
- Hilib, caano iyo ukun
- Bariis, digir iyo cuntooyinka qalalan
- Miro si aad dhir u abuurato

19. Maxay yihiim waxyaabaha AADAN ku soo iibsan karin lacagta ku jirta kaarka P-EBT ga?

Waxyaabaha AADAN iibsan karin waxaa ka mid ah:

- Cunnooyinka la diyaariyey oo la iibiyo iyagoo karsan ama diyaar ah in la cuno
- Xafaayaddaha
- Waxyaabaha nadiifinta alaabada
- Waraaqaha musqusha, waraaqaha af-tirtirka, iwm.
- Kaabayaasha / dawooyinka
- Cuntada xayawaanka
- Aalkolhulka

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan cuntooyinka lagu iibsan karo booqo: https://www.fns.usda.gov/snap/eligible-food-items

20. Yaan kala xiriirayaa wixii su'aalo dheeraad ah ee laga qabo in aan ka qabo P-EBT?
Wixii su'aalo dheeraad ah ee aad ka qabto P-EBT, wac khadka Caawinta PEBToo ah **(833) 496-0661.**